



Ka turjumaysa 2017-18, oo la rajeynayo mustaqbalka soo socda

Qoysaska PPS ee Qaaliga ah,

Iyada oo sanad dugsiyeedkii 2017-18 uu soo geba gabobay, waxaan jeclaan lahaa in aan u mahad celiyo ardaydeena, macallimiinteena, shaqaalaha taageerada, iyo hoggaamiyeyaasheena dugsiiga taasi oo la xiriirta shaqadoodii adkeyd ee ay qabteen. Waxay dhammaantood heleen fasaxa waqtiga xagaaga oo ay u qalmaan. Toddobaadkii la soo dhaafay in ka badan afar kun oo arday ayaa socod ku maray masraxa dugsiiga sare oo kala duwan ee xafladaha qalin jabinta isla markaana helay shahaadooyinkoodii. Hambalyo ayaanu leenahay ardaydeena sanadkii u dambeeyay dhiganaysa gaarida ay gaareen heerkan muhiimka ah. Waxaanu idiin rajeynaynaa guul aad u badan oo ku saabsan dadaalkiina dambe.

Waxaan waqti ku bixinayay in aan ka turjumo waxyaabaha muhiimka ah iyo caqabada jiray sanad dugsiyeedkan waxaan ka fikirayaa fursadaha iyo shaqada soo socda.

Marka hore, waxaan jeclaan lahaa in aan sheego in ay farxad dhab ah ii ahayd in aan barto kuwo badan oo idinka mid ah sideedii bilood ee la soo dhaafay, wada sheekaysigii aan ku wada sheekaysanay dhulka dugsiiga, kulamadii foolka foolka ahaa, email-kii aan ku wada xiriirnay, iyo dhacdooyinkii aan tirada lahayn ee dugsiiga iyo kuwii gaarka ahaa. Waxaan u imid in aan arko Portland oo ah magaalo dareen weyn u qabta waxbarashada dadweynaha, isla markaana waalidiinta iyo mas'uuliyiintu ardaydu ay noqon karaan isbahaysi muhiim inaga oo ku dadaalayna sidii aan u wanaajin laheyn natiijooyinka ardayga.

Ballanqaadeena waa in PPS laga dhigo in uu noqdo nidaam dugsi oo heer sare ah, oo ah mid xaqiijiya guusha arday kasta. Waxaan aamisanahay in aanu qaadnay tallaabooyin hore oo geesinimo leh oo bilaabay in la dejiyo aasaas muhiim ah. Tani waxaa ka mid ah: dib u habeyn la taaban karo oo lagu sameeyay xafiiska dhexe, dib u bilaabida tilmaamo iyo diirad saarid ku saabsan wax barida iyo waxbarashada, bilaabida horumarinta K-12 ee manhajka aasaasiga ah iyo xallinta qandaraaska macallimiinta; kuwani waa tusaalooyin kar. Waxaan si adag u shaqeyn doonaa xagaagan, isku diyaarineynaa furitaanka laba dugsi dhexe oo dhammeystiran, iyada oo ay mahada iska leeyihiin cod bixiyayaashu, casriyeynta dugsiiga oo ay dheer tahay shaqada caafimaadka iyo ammaanka ayaa ka sii socota dhismayaasheena. Iyada oo la eegayo talo soo jeedintii baaritaankii dhawaan la sameeyay, waalidiintu waa in ay sidoo kale ogaadaan in aanu dhaqan gelin doona tallaabooyin cusub iyo tababarka si loo xaqiijiyo in wixii warbixin ah ee ku saabsan dhaqan xumo in si buuxda loo baaro.

Rajo fiicnideyda ku saabsan mustaqbalka degmadeenu wuxuu ka yimaadaa shaqada adag ee ay hayaan shaqaalaha wanaagsan ee xirfadda iyo dadaalka leh, wada shaqeynta ka dhaxaysa Guddiga Waxbarashada, iyo kumanaanka qoys iyo kooxaha wax daneeya ee bulshada ee dadaalaya isla markaana hawsha ku lug leh. Waxaan aamisanahay in dhammeentaan aan shaqeynayno inaga oo aaminsan in arday kastaa u qalmo fursad uu horumar ku gaaro.

Waxaan rabaa in aan idin siiyo fursad la xiriirta hordhaca waxyaabaha soo jiidashada leh ee soo socda: Dayrtan soo socota waxaanu bilaabi doonaa nidaamka aragtida bulshada oo loogu talagalay in uu naga caawiyo aqoonsiga iyo sheegida rabitaanka aan wadaagno ee loogu talagalay ardayda iyo waayo-aragnimadooda waxbarasho. Waxaanu ku martiqaadi doonaa macallimiinta, xubnaha ka tirsan qoyska, ardayda iyo xubnaha ka tirsan bulshada in ay na siiyaan talo nagu wargelin doonta dejinta khariidad cad oo loogu talagalay nidaamkeena dugsiga ee mustaqbalka.

Waad ku mahadsan tihiin taageeradiina aad siisaan ardaydeena iyo dugsiyadeena. Waxaan rajeynaynaa in aanu ardayda Fasalka 1-12 dib u soo dhaweyno Ogoosto 27 iyo ardayda dugsiga barbaarinta carruurta 'Kindergarten' ee cusub oo soo noqonaya Ogoosto 30.

Waxaanu qof kasta u rajeynaynaa fasaxa xagaaga oo badbaado iyo raaxo leh,

Guadalupe Guerrero
Kormeeraha guud